# FAAFIN RASMIAH
# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA
لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad | Muqdisho, 30 Jannayo 1976 | L. 3, R. 1

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## S H A R C I

W. M.

## BOGGA LABAAD


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 29 Dishembar 1975, L. 12 — *Magacaabid Lataliye Maxkamadda Badbaadada Dalka.* Bog. 95

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 20 Oktoobar 1975, L. 13 — *Cad dhul Dowladeed, gatay Jaalle Maxamed, Abuukar Maxaad, ku yaal Muqdisho, Jidka Madiina, kuna fadhiya mq. 1.293. Cad Dhul Dowladeed la siiyay Yaxya iyo Geeni Cumar Cabdulle kuna fadhiya mq. 492.* » 96

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 20 Oktoobar 1975, L. 14 — *Cad dhul Dowladeed gatay Jaalle Maxamed Abuukar Maxaad, ku yaal Muqdisho Xaafadda Shibis kuna fadhiya mq. 216.* » 98



Madbacada Dawladda — Muqdisho

# BOGGA SEDDAXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Jennayo 1976 — *Naado dhul Jaalle Maxamed Sheekh Xasan.* (23) Bog. 100

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Jennayo 1976 — *Naado dhul Maxamed Nuur Calasow.* (24) » 101

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Jennayo 1976 — *Naado dhul Jaalle Maxamuud Axmed Duugsiiye.* (25) » 102

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Jennayo 1976 — *Naado dhul Jaalle Dheere Maxamed Axmed.* (26) » 103

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 11 Jennayo 1976 *Lumid Buugga Kaydka Lam. 7514. Shs. 631,10 u leeyahay Cumar Xaaji Maxamed.* (27) » 103

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, Jannayo 1976 — *Lumid Buugga Kaydka L. 11122 Shs. 1.201 ay ledahay Caasha Cusmaan Xasan.* (28) » 104

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 2 Febrayo 1976 — *Lumida Jeega Wareega Lamb. 003661. Shs. 7.000, u Cabdishakuur Faarax Cali.* (29) » 104

# BOGGA LABAAD

XEER L. 12 ee 29 Dishembar 1975.

Magacaabid Lataliye Maxkamadda Badbaadad Dalka.

## GUDDONSHAHA
## GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo Tan 2aad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 1 ee soo baxay 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Dekreetada Golaha Sare ee Kacaanka L. 12 ee 25kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga L. 3 ee 10kii Jennayo 1970, kuna saabsan Dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo bedelaaddii ka danbeysay;

MARKUU ARKAY Qod. 22-3 ee Sharciga L. 34 oo soo baxay 22kii Sebtembar 1974, kuna saabsan Nidaamka Garsoorka;

MARKUU TIXGELIYEY In ay tahay lagama maarmaan in Maxkamadda Badbaadada Dalka loo magacaabo garsoore kale si cadaaladda loo socodsiiyo;

MARKUU DHEGEYSTEY Soojeedinta Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo A. Diinta;

## WUXUU SOO SAARAY

Xeer soo socda:

### Qodobka 1aad

Jaalle Dr. Axmed Cali Saalax, oo ka tirsan Shaqaalaha Maxkamadda Badbaadada Dalka, waxaa loo magacaabay Garsoore ka mid ah Garsoorayaasha Maxkamadda Badbaadada Dalka, wuxuuna ka mid noqonayaa Kaalinta Garsoorayaasha.

### Qodobka 2aad

Mushaarka iyo gunnada Garsooraha kor lagu tilmaamay waxay ka imaanayaan Miisaaniyadda Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha GSK, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Dimoqaradiga Somaliya.

Muqdisho, 29 Disbembar 1975.

GUDDOMIYAHA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo A. D.
*Jaalle Cabdisalaam Sheekh Xuseen*

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda
*Jaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 48.*
*Muqdisho, 10 Jannayo 1976.*
*Hantidharaha Guud:*
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

---

**XEER L. 13 ee 20 Oktoobar 1975.**

**Cad dhul Dowladeed, gatay Jaalle Moxamed Abuukar Maxaad, ku yaal Muqdisho, Jidka Madiina, kuna fadhiya mq. 1,293. Cad dhul Dowladeed, la siiyay Yaxya iyo Geeni Cumar Cabdulle, kuna fadhiya mq. 462.**

XOGHAYHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxday 23kii Maajo 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu koonsaday Yaxya iyo Geeni Cumar Cabdulle taarikhdu markay aheyd 29-8-1960, kuna weydiisteen dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho, Jidka Madiina, kuna fadhiya mq. 1.785. Kuna dhacaaya qaybta V°;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhuulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 2-4 soona baxday 20-4-1961, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 1241 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 3aad taarikhduna aeyd 6-6-1964, kuna saabsan dhismo guri mq. 1.785;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 2888 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkoodu ahaa 1241 laguna aqoonsaday fadhigii 10aad ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay aheyd 7 Oktoobar 1969, kuna saabsan dhismo Guri mq. 1.785;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 96588 ee 1-11-1967 kana soo baxaday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Yaxya Cumar Cabdulle iyo Geeni Cumar Cabdulle uu bixiyeen lacag dhan Sh. So. 3.570, kuna saabsan qiimaha dhuulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.785, loona tiriyay Yaxya Cumar Cabdulle iyo Geeni Cumar Cabdulle sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) aarikhdeeduna aheyd 16 Abrile 1968;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhuulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal rayadka ah (Scrittura Privata) laguna bixiyay Xeer iyo xixiba, taarikhdeeduna aheyd 24-6-1959, lagna diiwaan geliyay Xamar 29 Giugno 1969 lamb. 2439 Atti Privati Vol. 58 loogana qaatay Sh. So. 553, taas oo Cumar Cabdulle oo u ah wakiil caruurtiis Yaxya Cumar Cabdulle iyo Geeni Cumar Cabdulle, wuxuu ka gadgy kuna wareejiyay Sheekh Moxamed Moxamuud Faqi wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ii ku fadhiya mq. 1.293, kuna yaal Muqdisho, Jidka Madina;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 275 Reb. taarikh. 6 Agosto 1969, lagu diiwaan geliyay Xamar 9 Agosto 1969 lamb. 568 Atti Pubblici Vol. 19, oo ah caddeynta Notaayada Dr. Benvenuto Francesco Issaq, taas oo Sheekh Maxamed Moxamuud Faqi ka gatay kuna wareejiyay Moxamed Abuukar Maxaad wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismahii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1.293, kuna yaal Muqdisho, Jidka Madina;

XEER

B) — Waxaa cad dhul Dowladeed ah gatay Moxamed Abuukar Maxaad oo ku yaal Muqdisho — Waddada Madina kuna fadhiya mq. 1.293.

T) — Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Geeni Cumar Cabdulle iyo Yaxya Cumar Cabdulle oo ku yaal Muqdisho — Waddada Madian kuna fadhiya mq. 492.

Muqdisho, 20 Oktooabar 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*Inj. Maxaamed Xawaadle Maadar*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwanku lamb. 1; Bogga lamb. 28.*
*Muqdisho, 19 Nofembar 1975.*
*Hantidhawraha Guud:*
D. Dhexe Cabdiillahi Wrasame Nuur

XEER L, 14 ee 20 Oktoobar 1975.

**Cad dhul Dowladeed, gatay Jiffle Moxamed Abuukar Maxad, ku yfil Muqdisho, Xaafadda Shibis, kuna fadhiya mq. 216.**

## XOGHAYHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKA Xeer lamb. 144 soona baxday 23kii Maajo 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Arji uu kneesaday Moxamed Cali Saalax taarikhdu markay abeyd 23-1011961 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho, Xaafadda Shibis, kuna dhacaaya qaybta V°;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada Dhuulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, lamb. 3 soona baxday 1-3-1964, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAYNaqshadda lamb. 6138 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay heray u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 330° taarikhduna aheyd 21 Maajo 1964, kuna saabsan dhismo Guri mq. 216;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 26844 ee 22-8-1964 kana soo baxaday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Moxamed Cali Saalax uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 432, kuna saabsan qiimaha dhuulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 216, loona tiriyay Moxamed Cali Saalax sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di ronsegna) taarikhdeeduna ahayd 7 Sebtembar 1964;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 6157 Reb. taarikh. 27 Febbraio 1965 lagu diiwaan geliyay Xamar 3 Maarso 1965 al n. 156 Atti Pubbliri Vol. 16 oo ah caddeynta Notaayada Micheal Mariano taas oo Moxamed Ali Saalax ka gaday kuna wareejiyay Cumar Yaslam Ba Ramadan wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka ah oo ku fadhiya mq. 216, kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 369 Reb. taarikh. 14 Febbraio 1967 lagu diiwan galiyay Xamar 16-2-1967 lamb. 126 Atti Pubblici Vol. 18 oo ah caddeynta Notayada Dr. Xasan Warsame Cali taas oo Cumar Yaslam Ba Ramadan ka gaday kuna wareejiyay Moxamed Xasan Moxamed wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 216, kuna yaal Muqdisho, Xafadda Shibis;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) lamb. 1433 Reb. taarikh. 7 Dishembar 1970, lagu diiwaan geliyay Xamar 8-12-1970 al n. 996 Atti Pubblici Vol. 20 oo ah caddeynta "Notayada" Dr. Benvenuto Francesco Issaq taas oo Moxamed Xasan Moxamed ka gaday kuna wareejiyay Moxamed Abuukar Maxaad wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 216, kuna yaa lMuqdisho, Xaafadda Shibis;

X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed ah gatay Moxamed Abuukar Maxaad oo ku yaal Muqdisho, Xaafadda Shibis, kuna fadhiya mq. 216.

Muqdisho, 20 Oktoobar 1975.

Xoghayaha Wasaaraddà Hawlaha Guud
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

*WAAN ARGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lab. 31.*
*Muqdisho, 9 Nofembar 1975.*
*Hantidhawraha Guud:*
G. Dhexe Cabillahi Warsame Nuur

## TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS WIXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Sheekh Xasan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taarikhdu ahayd 11 Lulyo 1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolaar ah 27x13,50 kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxa ka xiga: Yaasiin Cabdulle Samantar.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dowladeed.

Bari waxa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Jennayo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhuulka

*(23)* *Inj. Ibrahim Cike Maydhane*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Nuur Calasow, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 8 Dishembar 1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar ah 27x13,50 kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Cali Cawaale Jaamac.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Jennayo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhuulka

(24) *Inj. Ibrahim Cige Waydhane*

## *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Axmed Dugsiiye, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 6 Dishembar 1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag( oo leh qiyaas afar gees siman 13,50x13,50 kunua fadhiya 182,25 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Caasha Bakhiid Warsame.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo Caadi ah.

Galbeed waxaa ka xiga: Aweys Cabdi.

Bari waxaa ka xiga: Waddo caadi ah.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Jennayo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhuulka

(25) *Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Dhaxal toyadi Dheere Maxamed Axmed, uu oos qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 8-12-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waaberi, oo leh qiyaas rektangolaar ah 12x5 kuna fadhiya 60 mdh.

Waqooyi waxaa ka xiga: Maxamed Nuur.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo caadi ah.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul horay loo siiyay jaallaha dhuulka laga dhaxlay.

Bari waxaa ka xiga: Waddada Ugandha.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Jennayo 1976.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhuulka.

(26) *Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

## MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

HADDU Arkay dacwada kor ku qoran;

MARKU Arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiskii bangiga Ganacsiga Soomaaliyeed Laana labaad (eeg. warq. Lamb. 559) wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;

HADDUU Arkay qod. 69 D. L. 9-9-65;

Lumidda buugga keydka lamb. 7514 kuna qoran 631.10 (lixboqol sodon kow iyo 10 cents).

### WUXUU AMRAYAA

In loo sammeyo buug cusub ninka la yirahdo Cumar Xaaji Maxamed, oo ah ninka iska lahaa buuggaas aan kor ku sootilmaaman, ee lumidiisa kor lagu cadeeyey ka dib markii 30 maalmood ka soo wareegto maalinta dekretada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In buuga cusug ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cumar Xaaji Maxamed, ama qof isla asaga kasita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor soo sheegnay.

Xamar, 11 Jennayo 1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Xamar

(27) *Jaalle Cabdullahi Daahir Barre*

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDU Arkay dacwadda kor qoran;
MARKU Arkay maxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga Soomaaliyeed laanta 1waad (ceg warq. Lamb. 00504) wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa;
HADDU Arkay qod. 69 D. L. 9-9-65, n. 2;
Lumida buugga keyda Lamb. 11122 kuna qoran di Shs. So. 1.201 (Kunlababoqol iyo Kow).

WUXUU AMARAYAA

In loo sameeyo buug cusub gabadha la yiraahdo Caasha Cusmaan Xasan, oo ah gabadha iska leh buugaas aan kor ku soo tilmaaman; ee lumidiisa kor ku cadeeyey ka dib markii 30 maalmood ka soo wareegto maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buuga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Caasha Cusmaan, ama qof isla asaga ka sita wakaladda sharci ah, ayadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee kor soo sheegnay.

Muqdisho, 24 Jannayo 1976.

Guddoomiyaha Maxk. Gobolka Benaadir
*Jaalle Abduullahi Daahir Barre*

(28)

---

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDU Arkay dacwadda kor qoran;
MARKU Arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bangiga ganacsiga (ceg warq. 556), wuxuu ogaaday inay shaqaalah tahay;
HADDU Arkay qod. 69, D. L. 9-9-65, N. 2;
Lumidda jeega wareega lamb. 003661 kuna qoran di Shs. So. 7.000 (todobakun).

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo jeeg wareega ninka la yiraahdo Cabdishakuur Faarax Cali, oo ah ninka jeega qoran aan kor ku soo sheegnay, lumiddiisa kor ku cadeyey kad dib markii 15 maalmood ka soo wareegto maalinto dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA L CODSANAYAA

In jeega cusub ee la somayn doono gacanta saaro Jaalle Cabdishakuur Faarax Cali, ah, ayadoo la sugaayo mudada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 2 Febrayo 1976.

Gudoom. Maxkamadda Gobolka Banaadir
*Jaalle Abduullahi Daahir Barre*

(29)